

TUKARAQ: Baroortu orgiga ka weyne, ma batrool baa ku jira

Humaagayn xiiso leh oo lagu sameeyay is-maan-dhaafka Tukaraq ee gacan-ka-hadalka keenay ayaa tibaaxday inuu ergayga gaarka ah ee Qaramadda Midoobay, Michael Keating, oo Jabuuti ku sugani uu shir fogaan-maqal ah (Teleconference) isugu yeedhay madaxweyneyaasha Soomaalida qaarkood, oo ay ka mid yihiin Farmaajo, Muuse Biixi, Cabdiweli Gaas, Ismaaciil Cumar Geele, iyo Cabdi Maxamed Cumar (Sawirka hoose eeg). Ka dibna su'aal isku mid ah ayuu waydiiyay dhamaantood, oo ah "**Maxaa keenay dagaalka Tukaraq, iyo muhiimadda adiga daabiyaddan kaaga jirtaa maxay taha? Hoos ka akhri jawaabahooda oo ay mdina maan-gal noqon wayday.**



Madaxweyne Farmaajo: Muhiimadda igaga jirtaa waxay tahay "dhiiga ummadda Soomaaliyeed ee ku daadanaya Tukaraq ayaa i dhibaya", dhinaca ay doonaan ha ka soo jeedaane, waayo anigaa Madaxweyne u ah dhamaan ummadda Soomaaliyeed.

Keating: Waar Farmaajo, miyaanad Ilaahay ka yaabayn! Intuu uu is-maan-dhaafku ka taagnaa Tukaraq, dagaallo faraha lagaga gubtay ayaa ka dhacay Moqokori, Teed, Kulbiyow, Badhaadhe, iyo Galgala. **Haddana, mar keliya maan maqal adigoo ka hadlay dagaaladdaas.** Markaa inta aanad ka hadlin Somaliland iyo Puntland oo nabad ah (Marka laga reebo aaga Tukaraq iyo

Galgalla), hadday Soomaalinimaddu run kaa tahay, Koonfurta ayaad hawsheeda ka shaqayn laahyd.

Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle ayaa oo aan hadalkii la siinin ayaa is-hayn waayay oo yidhi: WAARYAA FARMAAYO, WAADIGA LEH UMMADDA SOOMAALIYEED OO DHAN BAAN MADAXWEYNE U AHAY, maca aniga miyaad ii tahay, waaryaa!, maxaad beenta u sheegi Xamar baanad qaybo xukumine!.

Madaxweyne Cabdiweli Gaas: Anigu waxaan difaacayaa MIDNIMADDA SOOMAALIYEED, tan labaadna dadka Sool barri, Sanaag barri, iyo Togdheer bari degen isku isir baanu nahay; oo reer Puntland.

Keating: Waar Cabdiweli, waxaabad kala goynaysaa gobolka Sool, oo adigu Tukaraq oo keliya ayaad rabtaa oo dagaalkanba ku gelisay, markaa midnimo-doon kaama ah ee runta sheeg.

Madaxweyne Maxamed Cabdi Cumar (Ina Ilay): oo aan hadalkii la siinin ayaa is-hayn waayay, oo khadka soo galay oo yidhi: Inaadeer Cabdiweli Gaasoow Ilaahay ka cabso, haddii aad isir u dagaalamayso, anigaad Itoobiya iga xorrayn laahyde, waayo kuwaa aad hadda sheegaysaa dhamaantood waa Soomaali. Tan kale, **adiga adeerkaa laxmi ahi wuxuu degen yahay tuuladda Magacley oo Burtinle u jirta 7km, balse Itoobiya ka tirsan, isku isir ma tihidin miyaa?**

Madaxweyne Muuse Biixi: Anigu waxaan u dagaalamayaa inaan gaadho xuduuddii Ingiriisku noo jeexay ayay nimankani nagu haystaan ee nagala hadla. Waana isku qolo Farmaajo iyo Cabdiweli gaas oo hoostuu uga hiilinayaa ee rumaysan ilmaddiisa waa tii Yaxaaska (Crocodile's tear).

Keating: Waar Muusoow, haddii idinka aanu arrinkiinu dhaafsiisnayn xuduud Ingiriisku jeexay, oo aad ka qancaysaan, anigaa Ingiriis ah oo hadda xuduud cusub idiin jeexaya, oo Harergysa laab is-le'eg u qaybisa, oo qayb Itoobiya raacinaysa, ileen berrigii horeba (1954) waydinkuu ogolaaday markii ay dawladdii Ingiriisku Itoobiya raacisay reserved area iyo Hawd plateau, oo maanta ay ka mid yihiin degmooyinka **Jigjiga, Aw Barre, Lafo Ciise, Qabri Bayax, Xarshin, Awaare, Darroor, Gaasghaamo**, iwm. Haddeerna degmooyinka Somaliland oo at Tukaraq, Laas Caanood, iyo Hargeysa badhkeed ku jiraan ayaan Itoobity raacin doonaa. Markaa halkaa ka sii wad "Xuduuda Ingiriisku jeexay ee aad difaacaysa".

Madaxweyne Maxamed Cabdi Cumar oo hadalka la siinin ayaa khadka soo galay isagoo leh: horta Somaliland maadxdeedu miyaanay ogayn in Mijaahidiintii Daraawiisheed ee uu hogaaminayay halgamaagii waynee ee Sayid Maxamed Cabdulle Xasan (Ilaahay ha u naaxriisto dhamaantood) inay 90% ka soo jeedeen goboladda Sool iyo Buuhoodle, oo ay gudabi weyni

taalo iyaga iyo Ingiriiskan aad sanko ka marmarinaysaan. Waar caqli kale oo ay idinku raacaan keena.

Tan kale, waadiga leh Farmaajo iyo Cabdiweli waa isku hayb oo way isu hiilinayaane, dee reer Sool iyo aniguba la hayb baanu nahay ee colaadda ha isku balaadhinin.

Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle: Aniga muhiimadda igaga jirtaa waxay tahay, ummadda Soomaalidu ma kala maaranto, markaa iyagu dhexdooda ha dhamaystaan arrinta Tukaraq.

Keating: Waar Ismaaciiloow; haddii ay Soomaalidu dhexdooda heshiis gaadhayaan ilaa 9kii Abriil 1979, oo 40 gu' laga joogo way ku guul daraysteene, ma caqli Tukaraq ka dhashay baa isu keenaya. Tan kale, waadiga yidhi ummadda Soomaalidu ma kala maarmi karto ee adigu miyaanad Soomaali ahayn, oo aanay ahayn inaad ku biiro Soomaalida aan kala maarmayn.

Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle: Waryaa, Jabuuti waa Franco Phone oo kuma jirto Soomaalidan Duulada ah, ee afka ka jeedi baan ku leeyahay, walaahi anigu waan aqaan inan yar oo cadaan ah oo arrimahayga ka bixi waayay sida loo galo.

Keating: Somali presidents, thank you for your participation in this very interesting teleconference. Ka dibna, shir jaraa'id ayuu qabtay oo uu yidhi shan qodob baanu isku af-garanay